PUB 195US (9-23) Somali

# Sharuudaha Aqoonsiga iyo Daganaanshaha Oo Muwaadaniinta Mareykanka

Sida qeyb ka ah dadaalka dalkoo dhan ee lagu xoojinayo soo saarista aqoonsiyada aqoonsiga illaalsan, Pennsylvania waxay uga baahantahay dokumentiyada Muwaadaniinta Mareykanka ee codsanayo Shatiga Darawalnimada Pennsylvania, Shatiga Ardayga ama Kaarka Aqoonsiga (ID) Kaarka ama Muwaadinta Mareykanka oo wareejinayo Kaarka Shatiga Darawalnimada iyoama Kaarka Aqoonsiga ee gobolka ka baxsan.

**FADLAN OGOW: Haddii aad codsaneysid badeecada REAL ID fadlan tixraac Liiska Hubinta Dokumentiga REAL ID ee websaydka PennDOT ee https://www.dmv.pa.gov/REALID wixii warbixin dheeraad ah.**

## Sharuudaha Da'da ee Muwaadaniinta Mareykanka

Shaqsiyaadka codsanayo Shatiga Darawalnimada Aan Ganacsiga aheyn waa inuu ahaadaa ugu yaraan 16 sanno jir.

Shaqsiyaadka codsanayo Kaarka Aqoonsi (ID) waa inay jiraadaan ugu yaraan 10 sanno da'da ah.

Shaqsiyaadka wareejinayo Shatiga Darawalnimada Aan Ganacsiga aheyn waa inuu ahaadaa ugu yaraan 16 1/2 sanno jir.

Shaqsiyaadka codsanayo Shatiga Bartaha darawalnimada Pennsylvania waa inuu ahaadaa ugu yaraan 16 sanno jir.

Shatiyada Bartaha darawalnimada gobolka ka baxsan laguma wareejin karo Pennsylvania.

Shaqsiyaadka codsanayo ama wareejinayo Shatiga Darawalnimada Gacansiga waa inuu ahaadaa ugu yaraan 18 sanno jir oo darawalnimada gobolka dhexdiisa ama 21 sanno jir ama ka weyn oo darawalnimada gobolka dhexdiisa.

## Dagayaasha Pennsylvania

Haddii aad ka yartahay da'da 18 oo aad tahay dage Pennsylvania waxaad u baahaneysaa inaad tustid:

- ❑ hal qaab oo aqoonsiga Liiska A, iyo
- ❑ Kaarkaaga Amniga Bulshada.

Haddii aad tahay 18 sanno jir ama aad ka weyntahay oo aad dagantahay Pennsylvania waxaad u baahaneysaa inaad tustid:

- ❑ hal qaab oo aqoonsiga Liiska A,
- ❑ labo qaabab oo cadeynta daganaanshaha oo Liiska B, iyo
- ❑ Kaarkaaga Amniga Bulshada.

## Dagayaasha Cusub ee Pennsylvania

Dagayaasha cusub ee Pennsylvania ee haysto shatiga darawalnimada shaqeynayo ee gobol kaloo Mareykanka ah waa inuu ku helaa Shatiga Darawalnimada Pennsylvania 60 maalmood gudahood kadib u soo guurista PA oo soo dhiibaa shatigooda darawalnimada gobolka ka baxsan iyo/ama kaarka aqoonsiga.

Haddii aad tahay dage ku cusub Pennsylvania oo shatigaaga darawalnimada gobolka hore uu dhacay wax ka badan lix bilood ama aadan haysan shatiga darawalnimada gobolka hore waxaa lagaaga baahanyahay inaad codsatid Shatiga Bartaha PA oo aad iska qaadaa Baaritaanada Aragga, Cilmiga iyo Wadada.

Dagayaasha ku cusub Pennsylvania ee haysto shatiga darawalnimada shaqeynayo ee Puerto Rico ama dhulka Mareykanka ama haysashada waxay u wareejin kartaa shatigooda darawalnimada shaqeynayo Shatiga Darawalnimada Aan ganacsiga aheyn ee PA.

Dagayaasha ku cusub Pennsylvania ee haysto shatiga darawalnimada ganacsiga ah ee shaqeynayo (CDL) ee gobol ku yaalo Mareykanka waxay u wareejin karaan CDL-kooda ku PA CDL.

Haddii aad ka yartahay da'da 18 oo aad tahay dage ku cusub Pennsylvania waxaad u baahaneysaa inaad tustid:

- ❑ hal qaab oo aqoonsiga Liiska A,
- ❑ Kaarkaaga Amniga Bulshada, iyo
- ❑ shatigaaga darawalnimada iyo/ama Kaarka Aqoonsigaaga gobolka ka baxsan.

Haddii aad tahay 18 sanno jir ama aad ka weyntahay oo aad tahay dage ku cusub Pennsylvania waxaad u baahaneysaa inaad tustid:

- ❑ hal qaab oo aqoonsiga Liiska A,
- ❑ labo qaabab oo cadeynta daganaanshaha oo Liiska B,
- ❑ Kaarkaaga Amniga Bulshada, iyo
- ❑ shatigaaga darawalnimada iyo/ama Kaarka Aqoonsigaaga gobolka ka baxsan.

## LIISKA A:

**Qaababka Aqoonsiga laga aqbali karo Muwaadaniinta Mareykanka:**

- ❑ Shahaadada Dhalashada oo leh shabada kacsan *(Mareykanka waxaa soo saaray hay'ad dowladeed oo u idman, oo ay ku jiraan dhulalka Mareykanka ama Puerto Rico. Shahaadooyinka Dhalashada Aan Mareykanka aheyn lama aqbalayo.)* ***Fiiro gaar ah:*** *Shahaadooyinka Dhalashada ee Puerto Rico waa inay yeelataa taariiqda soo saarista oo ah 7/1/10 ama ka dambeyso si loo aqbalo.*
  - *Haddii shahaadada dhalashadaada ay ku jirto luuqada sheegeyso diiwaanka dhalashada oo aan cadeyneynin muwaadinnimada Mareykanka, dokumenti dheeraad ah ayaa loo baahan karaa.*
- ❑ Shahaadada Muwaadinka Mareykanka (USCIS Foomka N-560 ama N-561)
- ❑ Wargelinta Qunsulka ee Dhalashada Dibada (DOS Foomka FS-240)
- ❑ Shahaadada Wadaniyeynta (USCIS Foomka N-550 ama N-570)
- ❑ Baasaboorka Mareykanka oo Shaqeynayo

***FIIRO GAAR AH: Kaliya Baasabooro shaqeynayo iyo dokumenti asal ah ayaa la aqbalayaa. Haddii magaca ku yaal dokumentigaaga asalka uu ka duwanyahay magacaaga hadda, waa inaad bixisaa dokumentiga isku xirayo magacyada, sida Shahaadada Guurka asalka ah, Qoraalka Furiinka, ama dokumentiga Amarka Maxkamada.***

## LIISKA B:

**Liiska Dokumentiyada La aqbali karo oo Cadeynta Deegaanka oo Codsadaha 18 Sanno Jirka ah ama Ka weyn: Cadeynta dokumentiga daganaanshaha waa inay wataan magacaaga iyo ciwaanka rasmiga ah ee wadada Pennsylvania.**

- Calaamooyinka boostada/baakida boostada ku calaameysan oo dhinaca USPS, UPS, FedEx iwm.
- Foomka W-2/rasiidka lacag bixinta
- Heshiisyada kirada ama dokumentiyada deynta guriga
- Diiwaanada Canshuurta Rasmiga ah oo ka turjumayo magaca hadda iyo ciwaanka
- Hadda, shatiga darawalnimada aan dhicin PA ama kaarka sawirka Aqoonsiga
- Kaarka diiwaangelinta gaariga PA
- Kaarka caymiska tooska ah
- Biilka korontada kumbuyuutarka soo saaro oo muujinayo magacaaga iyo ciwaanka (mobeelka, fiilada, korontada, gaaska)

***FIIRO GAAR AH:*** *Haddii aad la dagantahay qof, oo aanan biilasho ku qorneyn magacaaga, waxaad weli u baahaneysaa inaad bixisid labo cadeyno oo deganaanshaha. Hal cadeyn waxaa keenaya qofka aad la dagantah ay oo ay wehliyaan Shatiga Darawalnimada ama Aqoonsiga Sawirka ee xarunta Shatiga Darawalnimada. Waxaad sidoo kale u baahaneysaa inaad bixisid cadeyn labaad oo deganaanshaha ah sida calaamadaha boostada/baakida boostada ku calaameysan oo dhinaca USPS, UPS, FedEx, iwm. oo ku yaalo magacaaga iyo ciwaanka. Ciwaanka waa inuu barbardhigmaa midka qofka aad la dagantahay.*

## FADLAN OGOW

Dhammaan dokumentiyada waa inay tusiyaan isla magaca iyo taariiqda dhalashada, ama xiriirka u dhaxeeyo warbixinta ku qoran dokumentiyada. Dokumenti dheeraad ah ayaa loo baahan karaa haddii xiriirka u dhaxeeyo dokumentiyada aanan la aasaasi karin (tusaale ahaan, Shahaadada Guurka, Amarka Maxkamada ee badelka magaca, Qoraalka Furiinka, iwm.)